

## Korjoogteynta Suuqa Daryeelka Caafimaadka

# Jaamacadda Caafimaadka & Sayniska ee Oregon yo Nidaamka Caafimaadka ee Dhaxalgalka ah

Barnaamijka [Kormeerka Suuqa Daryeelka Caafimaadka](#) (Health Care market Oversight, HCMO) wuxuu dib u eegid ku sameeyaa heshiisyada ganacsi si loo xaqijiyo inaysan waxyeello ku ahaan dadka iyo bulshooyinka ku sugar Oregon. Marka la gaaro Oktoobar 4, 2024, Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa aqbalay ogeysiis dhammaystiran ee wax-ka-beddelka agabka ee qeexaya qorsheyaasha Jaamacadda Caafimaadka & Sayniska ee Oregon ("OHSU") si ay u iibsato Nidaamka Caafimaadka Dhaxalgalka ah ("Legacy").

### Yaa ku lug leh?

**OHSU** waa nidaamka caafimaad ee jaamacadda dawladeed ee iska leh ama xiriirka la leh saddex isbitaal oo ku yaala aagga metraha (tareenka) ee Portland. Waxay sidoo kale leeyihiin xarumo caafimaad oo badan oo ku yaala Oregon. Nidaamka OHSU ayaa sidoo kale waxaa ka mid ah xarumaha cilmi-baarista iyo barnaamijyada waxbarasho ee jaamacadda. OHSU waxay u adeegtaa bukaanada ku nool Oregon oo dhan.

**Legacy** waa nidaam caafimaad oo ay leedahay hay'ad aan macaash-doон ahayn kaasi oo iska leh oo ka hawlgala lix isbitaal oo ku yaala nawaaxiga magaalooyinka Portland iyo Vancouver iyo bartamaha dooxada Willamette. Sidoo kale waxay ku leeyihiin oo ka hawlgalaan 70 ka mid ah rugaha caafimaadka ee bukaan-socodka oo ay ku jiraan rugaha daryeelka aasaasiga ah, rugaha daryeelka degdegga ah iyo rugaha daryeelka takhasuska leh oo ku yaala isla goboladaasi oo dhan.

### Ku saabsan qorshaha

OHSU waxay soo jeedinaysaa inay iibsato nidaamka Dhaxalgalka ah (Legacy). OHSU waxay sheegtay in nidaamka Legacy uu noqon doono mid ganacsi ahaan si buuxda ay leeyahay jaamacadda OHSU, Nidaamka Dhaxalgalka ahna waxaa si buuxda loogu biirin doonaa nidaamka OHSU. OHSU waxay sheegtay in isweydaarsiga ganacsi uusan waxba ka beddeli doonin heerka adeegyada la bixiyo, isweydaarsiyaduna waxay u saamaxayaan jaamacadda OHSU inay ballaarisoo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka.

### Maxaa xiga?

OHA wuxuu dib u eegayaa heshiiskan si loo fahmo sida uu u saamayn karo helitaanka daryeel ee bulshooyinka ku sugar Oregon. Inta dib u eegidu socoto, maamulka OHA wuxuu isticmaali doonaa xogta, wararka iyo warbixinada warbaahinta ee daryeelka caafimaadka, macluumaadka laga helo shirkadaha, iyo afkaarta dadweynaha si go'aan looga gaaro bal in heshiiska la ansixiyo iyo in kale. Kadib marka la dhammaystiro dib-u-eegista, maamulka OHA wuxuu soo saari doonaa go'aan khuseeya in heshiisku u socdo sidii loo qorsheeyay iyo in kale.

## Korjoogteynta Suuqa Daryeelka Caafimaadka

### Waxaan dooneynaa inaan adiga rayigaaga maqalno!

Aragtida dadweynuhu waxay naga caawisaa inaan fahamno sida heshiiskan u saameyn karo dadka ka tirsan bulshadaada. Si aad u wadaagto fikradahaaga ku saabsan heshiiskan, fadlan iimeyl u dir [hcmo.info@oha.oregon.gov](mailto:hcmo.info@oha.oregon.gov), farriin cod ah ugu dhaaf 503-945-6161, ama buuxi [foomka faallada dadwaynaha](#). Faallada aad bixinayso, ku xus “OHSU” ama “Legacy”, waxa aad ka aaminsan tahay, iyo inaad taageersan tahay ama ka soo horjeedo heshiiska.

Dokumintigaan waxaad ugu heli kartaa luuqado kale, daabacaad ballaaran, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid si lacag la'aan ah. Nagala soo xiriir iimaylka [hcmo.info@oha.oregon.gov](mailto:hcmo.info@oha.oregon.gov) ama lambarka telefoonka 503-945-6161. Waan aqbalnaa dhammaan wicitaannada dadka maqalka ku adag yahay.

Haddii aad qabto wax suaalo ah oo ku saabsan warbixintan ama aad jeelaan lahayd inaad codsato xog dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir [hcmo.info@odhsoha.oregon.gov](mailto:hcmo.info@odhsoha.oregon.gov).